

This leaflet was produced by the Refugee Women's Resource Project at Asylum Aid as part of its campaign to raise awareness of the Home Office Gender Guidance. For more information go to [www.asylumaid.org.uk](http://www.asylumaid.org.uk)

The full Gender Guidance is called *Gender issues in the asylum claim* Asylum Policy Instruction (API) Home Office (March 2004). It can be found at: [www.ind.homeoffice.gov.uk/documents/asylumpolicyinstructions/apis/genderissueintheasylum.pdf?view=Binary](http://www.ind.homeoffice.gov.uk/documents/asylumpolicyinstructions/apis/genderissueintheasylum.pdf?view=Binary)

Waxa qoraalkan soo saaray kooxda 'Refugee Women's Resource Project ee hoos timaada 'Asylum Aid'. Waana qayb kamida kaanbaynka ay doonayaan inay ku baraarujiyaan Tasmada Jinsiga ee Home Office-ka. Wixii faahfaahina eeg boga [www.asylumaid.org.uk](http://www.asylumaid.org.uk)

Tasmada Jinsiga dhammeystiran waxa la yiraahdaa Arrimaha jinsiga ee sheegashada magangalyada Isfaridda Siyaasadda Magangalyada (Asylum Policy Instruction) (API) 'Home Office'-ka (March 2004). Waxaad ka heli kartaa [www.ind.homeoffice.gov.uk/documents/asylumpolicyinstructions/apis/genderissueintheasylum.pdf?view=Binary](http://www.ind.homeoffice.gov.uk/documents/asylumpolicyinstructions/apis/genderissueintheasylum.pdf?view=Binary)

This leaflet is available in Amharic, Arabic, Chinese, Farsi, French, Pashto, Somali, Tigrinya, Turkish, Urdu and Vietnamese



Charity Number 328729

Information in this leaflet was correct at time of publication June 2007

# Are you a woman seeking asylum in the UK?

## Ma waxaad tahay qof dumar ah oo UK ka dalbanaysa magangelyo?

English and Somali

Go to [www.asylumaid.org.uk](http://www.asylumaid.org.uk)  
Email: [info@asylumaid.org.uk](mailto:info@asylumaid.org.uk)

## This leaflet is to help women who are claiming asylum

- It tells you what you can expect when you claim asylum.
- It tells you what you can expect at your interview with the Home Office.
- It tells you what the Home Office will consider when making a decision on your asylum claim.

The Home Office has guidance to help its staff to deal with women's asylum claims. This is called Gender Guidance. This leaflet explains what HO caseworkers need to consider when they assess your asylum claim. It focuses on the standards outlined in the Gender Guidance.

## Qoraalkanu wuxuu caawinayaa dumarka sheeganaya magangalyo.

- Wuxuu kuu sheegayaa waxa aad filan karto markaad sheeganeyso magangalyo.
- Wuxu kuu sheegayaa waxa aad ka filan karto wareysiga aad la yeelaneyso Wasaarada Arrimaha Gudaha (Home Office).
- Wuxu kuu sheegayaa waxa uu tixgelin doono Home Office- ku marka uu go'aan ka gaarayo magangalyo sheegashadaada.

Waxa 'Home Office'-ku leeyahay nidaam shaqaalahooda arrinka ka caawineysa waxkaqabashada magangalyo sheegashooyinka. Tan waxa la dhahaa Tasmada Jinsiga (Gender Guidance). Qoralkani wuxuu fashirayaa waxa shaqaalaha arrinka ee 'Home Office'-ku eegayaan marka ay qiimeynayaan sheegashadaada. Waxay fiirinayaan nidaamka ku qeexan Tasmada Jinsiga.

# There are several stages when you claim asylum in the UK

## SCREENING

Your first interview with the Border and Immigration Agency (BIA) is called a screening interview. It is held at an Asylum Screening Unit (usually in Croydon or Liverpool). At this interview you will be asked to provide personal details such as your name, address and nationality and those of your family.

- If you need an interpreter at the screening interview and would prefer a female, in special cases the BIA will try to organise this.
- You can ask to be allocated to a female Case Owner and the BIA will do their best to provide this.
- If you wear a hijab, you will be asked to have your photograph taken showing your full face.

After screening you may be detained at Yarl's Wood or Oakington Immigration Removal Centres or you will be allocated to an asylum team in Central or West London, Solihull, Leeds, Liverpool, Glasgow or Cardiff.

If you are not detained, you will be given a form to apply for accommodation and money if you need it. For help with this application, contact your lawyer, the Refugee Council, Refugee Action, Migrant Helpline, Welsh Refugee Council or Scottish Refugee Council.

You can claim asylum in your own right, not just as a dependent of your husband or father (or other male relative). If you want to consider this, you need to discuss it with your lawyer.

## THE FOLLOWING STAGES APPLY TO PEOPLE WHO ARE NOT DETAINED

### FIRST REPORTING EVENT

You will be allocated to a Case Owner who will be your main point of contact throughout the whole of your asylum claim. Again you can ask for a female Case Owner and interpreter if you want one and the BIA will do their best to provide this.

At the first reporting event your Case Owner will explain the asylum process to you and you will be able to raise any concerns or ask questions relating to your asylum support (accommodation and money). If you require assistance with legal representation, the Case Owner will give you the relevant information.

### INTERVIEW

Within about a week you will be called for a full asylum interview with your Case Owner (see next page). If you have not been allocated a female Case Owner and would prefer one, you can ask to postpone your interview.

### DECISION

Shortly after your full asylum interview, you will receive the decision on your asylum claim. If you are refused asylum, you may be able to appeal to the Asylum and Immigration Tribunal. You should contact a lawyer immediately to get help with your appeal.

If you are detained you will go through a similar process but much faster.

Children are dealt with by a different process, not covered by this leaflet.

# Waxaa jira marxalado kala duwan marka aad magangelyo ka codsanaysid UK gudeheeda

## BAARITAANKA

Wareysiga ugu horreeya ee ay kula yeelanayso Hay'adda Xuuduudda iyo Socdaalka (Border and Immigration Agency (BIA)) waxaa loo yaqaanaa wareysiga baaritaanka. Waxaa lagu qabtaa Unugga Baaritaanka Magangelyo doonka (oo badanaa ku yaalla Croydon ama Liverpool). Wareysigaan waxaa lagugu weydiin doonaa inaad dhiibto faah faahintaada shakhsi ahaaneed sida magacaaga, cinwaankaaga iyo waddanka aad u dhalatay iyo kuwa qoyskaaga.

- Haddii aad turjumaan uga baahan tahay wareysiga baaritaanka aadna doorbidi lahayd dheddig, arrimo gaar ah ayey BIA isku daydaa iney diyaariso turjumaanka.
- Waxaad codsan kartaa in lagu qoondeeyo haweeney Arrinkaaga Gasha isla markaana BIA intii kareenkeeda ah ayey sameyn doontaa iney kuugu diyaariso.
- Haddii aad xiran tahay xijaab, waxaa lagaa codsan doonaa in lagu sawiro iyadoo wejigaaga oo dhan uusan dhar saameyn.

Baaritaanka ka dib waxaa laga yaabaa in lagugu xabbiso Xarumaha Saaridda Socdaalka ee Yarl's Wood ama Oakington ama waxaa lagu qoondeyn doonaa koox magangelyo doon oo joogta Bartamaha ama Galbeedka London, Solihull, Leeds, Liverpool, Glasgow ama Cardiff.

Haddii aan lagu xabbisin, waxaa lagu siin doonaa foom si aad ugu codsatid hoy iyo lacag haddii aad u baahan tahay. Si lagaaga caawiyo codsigaan, la xiriir qareenkaaga, Golaha Qaxootiga, hay'adda Refugee Action, Khabka Caawinta Muhaajiriinta, Golaha Qaxootiga Welishka ama Golaha Qaxootiga Scottish-ka.

Waxaad magangelyo ku codsan kartaa xuquuqdaada gaarka ah, ma aha inaad ku tiirsanaato ninkaaga ama aabbahaa (ama ragga kale oo qaraabadaada ah). Haddii aad dooneysid inaad tan ka fiirsato, waxaad u baahan tahay inaad kala hadashid qareenkaaga.

## MARXALADAHAA SOO SOCDA AYAA KU DABBAQMAYA DADKA AAN LA XABBISIN

DHACDA SOO SHEEGIDDA UGU HORREYSA  
Waxaa lagu qoondeyn doonaa qof Arrinkaaga Gala kaasoo ahaan doona meesha aad la xiriireysid ilaa iyo inta uu codsigaaga magangelyo doonku socdo. Mar kale waxaad codsan kartaa haweeney Arrinkaaga Gasha iyo turjumaan haddii aad dooneysid isla markaana BIA ayaa intii karaankeeda ah isku dayi doonta iney kuu diyaariso.

Dhacdada soo sheegidda ugu horreysa qofka Arrinkaaga Galaya wuxuu kuu sharxi doonaa hawsha magangelyo doonka waxaadna awoodi doontaa inaad la timaaddo wixii walaac ah ama aad su'aalo la xiriira taageerada magangelyadaada (hoy iyo lacag) weydiiso. Haddii aad u baahan tahay kaalmo lagaa siiyo wakiilnimada sharciga, qofka Arrinkaaga Galaya ayaa ku siin doona warka arrinka la xiriira.

## WAREYSIGA

Muddo dhan toddobaad gudeheeda ayaa laguugu yeeri doonaa wareysi magangelyo doon oo buuxa oo uu kula yeesho qofka Arrinkaaga Galaya (bogga ku xiga eeg). Haddii aan lagu qoondeyn haweeney Arrinkaaga Gasha aadna doorbidi lahayd taas, waxaad codsan kartaa in dib laguugu dhigo wareysiga.

## GO'AAN GAARIDDA

Wax yar ka dib wareysiga magangelyo doonka, waxaad helli doontaa go'aanka laga gaaray codsigaagii magangelyo doonka. Haddii magangelyo lagu diido, waxaad awoodi doontaa inaad rafcaan u dirsatu Maxkamadda Magangelyada iyo Socdaalka. Waa inaad qareen si deg deg ah ula xiriirtaa si aad caawino ugu heshid rafcaanka.

Haddii lagu xabbiso waxaad mari doontaa hawl taas la mid ah laakiin ka dhakhso badan.

Carruurta waxaa lagula dhaqmayaa hawl tan ka duwan, oo aan ku qorneyn warqaddaan qoran.

## Full asylum interview

At your full asylum interview, you will be asked to give more information about your asylum claim. Some women who have suffered sexual violence find it easier to tell their full story to another woman.

**A**

You can ask for a female Case Owner if you want one and the Home Office will do their best to provide this.

**B**

You can ask for a female interpreter if you want one and the Home Office will do their best to provide this.

**C**

You can ask for the interview to be taped and can then ask for the tape to take away with you.

(it is best to make all such requests in advance)

**D**

If you have suffered from sexual assault or other traumatic experiences, the caseworkers should recognise that you may have difficulties with concentration and memory. They should also recognise that it is hard to tell other people what happened to you. During the interview you can ask for a break if you want one. If you are not emotionally ready for an interview and you can get a note from your doctor confirming this, you can ask if it could be postponed.

**E**

If possible try to arrange for your children to be looked after whilst you are at the interview.

**F**

You should be interviewed alone, not with any relatives or children.

**G**

Your lawyer may be able to attend your interview with you, particularly if you are vulnerable.

## Waraysi magangalyo dhan (Full asylum interview)

Waraysiga dhan ee magangalyada, waxa lagu waydiinayaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan magangalyo sheegashadaada. Dumarka ay asiibtay dhibaato la xidhiidha jinsiga (sida kufsi, iwm), waxa laga yaabaa inay u sahlanaato inay qof dumara oo kale u waramaan.

**A**

Waxa aad waydiisan kartaa gabadh ku waraysata (female interviewer), haddii aad u baahantahay, Home office-kuna wuxu sameyn doonaa inti karaankiisa inuu kuu helo.

**B**

Waxa aad waydiisan kartaa gabadh kuu turjunta, haddii aad u baahantahay, Home office-kuna wuxu sameyn doonaa inti karaankiisa ah inuu kuu helo.

**C**

Waxa aad codsan kartaa in waraysiga cajalad laguugu duubo, kadibna waxad waraysan kartaa inaad qaadata cajaladda.

(waxa habboon in aad codsigan hore u dalbato)

**D**

Haddii ay ku asiibtay dhibaato la xidhiidha jinsiga, ama dhacdooyin kale oo qaracan leh, shaqaalaha arrinka qaadayaa waa inay fahmaan in dhib kugu noqon karaan fikirka iyo xasuustu. Waxa kaloo ay aqoonsanayaan inay dhib kugu noqon karto inaad dadka kale u sheegto waxa dhacay. Muddada waraysigu socdo, waxa aad waydiisan kartaa hakad yar si aad u nasato, haddii aad u baahato. Haddii aanad nafsiyan diyaar u ahayn waraysiga oo aad kala iman kartaa takhtar warqad sidas xaqiijineysa, waxa aad codsan kartaa in dib laguugu dhigo.

**E**

Haddii ay surtogal tahay, isku day inaad diyaarsato qof carruurta kaasii haya intaad aad ku maqantahay waraysiga.

**F**

Waa in gooni lagu waraystaa, oo aan carruur iyo ehel kale kula joogin.

**G**

Wuu iman karaa qareenkaagu (lawyer) waraysiga, gaar ahaan haddii dhibaato u nugushahay.

## What the Home Office will consider when making a decision on your asylum claim

According to the Gender Guidance, when you claim asylum Home Office caseworkers should take into account if

**A**  
You were persecuted for political activities even if these were at a low level such as giving people shelter or providing food

**B**  
You were persecuted because of your husband's/father's/brother's (or other male relative's) political activities or because it was assumed that you had the same political opinions as them

**C**  
State officials (eg military, police) persecuted you in a way that mainly affects women, such as through sexual violence or threats of sexual violence

**D**  
You were punished for not following rules of dress in your country like wearing hijab (scarf)

**E**  
Your country's laws allowed you to be discriminated against because you are a woman (eg inheritance laws, custody laws)

**F**  
Members of your family or your community harmed you (eg domestic violence, forced marriage or honour crimes) and state officials were unable or unwilling to protect you.

It is also relevant if you have feared such persecution, even though this has not actually happened to you.

When making a decision on your claim, the Home Office caseworkers should show that they have looked at information about women's rights in your country of origin. If they find that you cannot return safely to where you came from, they will still consider whether you could go to another part of your country. They should look at the country information to check whether a woman in your situation would be safe in another part of your country. If you disagree with their conclusions, your lawyer may be able to help you to dispute this.

It is important to give a full account of what has happened to you and what you fear if you are returned to your country of origin. It is also important to give any reasons as to why you think you have been or might be harmed.

## Waxa 'Home Office'-ku tixgelin doono marka uu go'aanka ka gaadhayo sheegashadaada

Marka la eego Tasmada Jinsiga (lab iyo dhedig), kolka aad sheegato magangalyo shaqaalaha 'Home Office'-ka ee arrinkaaga waa inuu eego

**A**  
In asbaabo siyaayadeed laguugu cadaadiyay, xataa haddii ay yartahay, sida guriyeenta iyo cunno siinta dadka

**B**  
In laguugu cadaadiyay hawlo siyaasadeed ee ninkaaga, aabahaa, walaalkaa(ama rag kale oo qaraabo ah) awgood, ama loo maleeyey in aad la fikrad siyaasadeed tahay.

**C**  
In saraakiil dawladeed (sida ciidan, boolis) kuu cadaadiyeen si aalaaba saameysa dumarka sida iyagoo isticmaalaya kufsi, ama ku hanjabaad kufsi, iyo wixii la mida

**D**  
In laguugu ciqaabay adoon dhar u gaara wadanka xidhan, sida xijaabka

**E**  
In sharciga wadankaaga oggolyahay in lagugula kaco takoor waayo dumar baad tahay (sida sharciyada xaqa haysashada carruurta iyo dhaxalka)

**F**  
Xubno qoyskaaga ama mujtamcaaga ay ku dhibaateeyeen (sida rabshada guriga, guurka khasabka ah, dilka sharafta lagu ilaaliyo) saraakiisha dawladduna ayan karayn ama donayn ina ku difaacan

Waxa kale oo la qadarinayaa xataa haddii aad ka baqday cadaadis noocaasa, inkastoo ayan wax kugu dhacin dhab ahaan.

Marka go'aan laga qaadanayo sheegashadaada, shaqaalaha arrinka ee 'Home Office'-ku waa inay muujiyaan inaay eegeen warbixinnada xuquuqda dumarka ee wadankii aad katimi. Haddii ay ogaadaan inaad si ammaan ah ugu noqon karin dhankii aad ka timid, waxay haddana eegayaan in aad meel kale oo wadankaaga ah nabdgeylo ugu noolaan karayso. Waxay eegayaan macluumaadka wadankaaga in meel kale oo wadanka kamid ah ay dumarka kula xaalka ahi nabad ugu noolaan karaan. Haddii aad go'aankooda wax ka qabto, qareenkaaga ayaa kaa caawin kara sidii aad uga doodi lahayd.

Waxa muhiim ah in aad si faahfaahsan u sharaxdo waxa aad la kulantay iyo waxa aad ka baqantahay inay kugu dhacaan haddii laguugu celiyo wadankaaga asalka. Waxa kale oo muhiima inaad sheegto asbaabaha ad is leedahay waa laguugu waxyeelleeyay ama waa laguugu waxyeelleeyn karayaa.

## Legal advice

If you have any questions about anything in this leaflet, please talk to your legal representative or contact an advice line on one of the numbers below.

You are recommended to get legal advice from a lawyer throughout the asylum process. Your lawyer should be regulated under the OISC (Office of the Immigration Services Commissioner). The Legal Services Commission pays lawyers to give free legal advice to people who have no income or a low income. This is called Legal Aid. Lawyers can give you free advice for your initial asylum claim if your claim for protection is reasonable. Lawyers can give you free advice at the appeal stage if your case has a reasonable prospect of success. You can seek another lawyer's opinion if your lawyer does not think your case has a reasonable prospect of success.

Your lawyer should go through all the reasons why you are claiming asylum with you. They should discuss with you all the issues mentioned in this leaflet, i.e. the persecution you suffered or feared, the reasons why you were persecuted, the protection provided by authorities to women like you in your country, and the possibility of your living safely in another part of your country.

In addition, your lawyer should make sure that the Home Office caseworkers are following their Gender Guidance.

Asylum Aid	020 7354 9264 • Mondays 2.00 – 4.30 and Thursday 10.00 – 12.30 <a href="http://www.asylumaid.org.uk">www.asylumaid.org.uk</a>
Immigration Advisory Service	020 7967 1200 • Monday 10 – 1.00 and Wednesday 2.00 – 5.00 <a href="http://www.iasuk.org">www.iasuk.org</a>
Refugee Legal Centre	020 7780 3220 • Monday, Wed, Friday 10.30 – 1.00 and 2.00 – 4.30 Free advice service for detainees 0800 592398 <a href="http://www.refugee-legal-centre.org.uk">www.refugee-legal-centre.org.uk</a>

## Talo xaga sharciga ah (Legal advice)

Haddii aad wax su'aalo ah hayso oo ku saabsan qoraalkan, fadlan la xidhiidh wakiilkaaga sharci ama khadka talooyinka ee nambarada hoos ku qoran

Waxa lagugula talinayaa inaad talo sharci u raadsato qareen inta hawl-galka magangalyadu kuu socoto. Qareenkaagu waa inuu hoos yimaadaa nidaamka OISC (Office of the Immigration Services Commissioner). Guddiga Adeegyada Sharciga, waxay bixiyaan kharajka qareenka si uu u siiyo adeeg lacag-la'aana dadka aan dakhliga lahayn, ama dakhligoodu yarahay. Tan waxa ladhahaa 'Legal Aid'. Qareenku waxa uu marka ugu horaysa ee aad sheeganeyso magangalyo ku siin karaa talo, haddii sheegashadaada macquul tahay. Qareen waxa kale oo talo bilaash ah bixin karaan rafcaanka, haddii ku guulaysiga arrinkaadu suurto gal tahay. Waxa kale oo talo waydiin kartaa qareen kale, haddii qareenkaagu u maleeyo inuusan arrinkaagu lahayn rajo guul macquul ah leh.

Qareenkaagu waa inuu kaala hadlaa asbaabaha aad u sheeganeyso magangalyo. Waa inay kula gorfeeyaan arrimaha ku xusan qoraalkan, sida cadaadiska aad la kulantay, ama aad ka baqaysid, sababta lagu cadaadiyay, difaaca ay mas'uuliyiintu siiyaan dumarka adoo kale ah ee wadankaaga, iyo suurgalka inaad meel kale oo wadankaaga ah aad ugu noolaan karto si ammaan ah.

Intaa waxa ku dheeraad ah, in qareenkaagu hubiyo in shaqaalaha arrinka ay raacaan Tasmadooda Jinsiga (Gender Guidance).

Asylum Aid	020 7354 9264 • Isniin 2.00 - 4.30 iyo Khamiis 10.00 -12.30 <a href="http://www.asylumaid.org.uk">www.asylumaid.org.uk</a>
Immigration Advisory Service	020 7967 1200 • Isniin 10 - 1.00 iyo Arbaco 2.00 - 5.00 <a href="http://www.iasuk.org">www.iasuk.org</a>
Refugee Legal Centre	020 7780 3220 • Isniin, Arbaco, Jimco 10.30 - 1.00 and 2.00 - 4.30 Adeeg talo lacag la'aana loogu talo galay maxaabiis 0800 592398 <a href="http://www.refugee-legal-centre.org.uk">www.refugee-legal-centre.org.uk</a>